# Isku Bedelka Qeybaha Dhiiga

Isku shubida qeybaha dhiiga, sidoo kale loo yaqaano dhiig bedelid, wuxuu horumarin karaa xaaladaha bukaanka. Wuxuu badbaadin karaa nolosha bukaanka. Tirada bukaanka kuwaasoo noqdo qaar aad u xanuusan ama u dhinta qeybaha dhiiga dartiis aad ayey u yar yihiin marka la barbar dhigo faaidooyinka qeybaha dhiigu ay bixin karaan.

Falanqee baahida gaarka ah ama sababta qeybaha dhiiga adiga ama ilmahaagu ay heli doonaan dhakhtarkaaga.

Qeybaha dhiiga inta badan waxaa loo isticmaalaa in lagu badelo unugyada dhiigo cas ama qeybaha kale ee dhiiga ee maqan ama heerarka hooseeyo sabab la xidhiidha dhaawaca ama xanuun.

## Halkee ayaa qeybaha dhiiga ka imaadaan?

Qeybaha dhiiga waxaa laga helaa dhiiga mutadawaciinta dhiiga bixiya. Barnaamijka deeqaha dhiigu wuxuu ogolaanayaa dhiiga in loogu deeqo:

- Bukaanka laftifgooda
- Deeqo aan la garaneyn
- Xaaladaha qaar, ee qof uu gaar uga dhigay bukaanka

Dhiiga waxaa laga yaabaa in laga dhigo mid uun qeybahan dhiiga:

**Dhiiga oo dhan**

Dhiiga oo dhan wuxuu wataa unugyada dhiiga cas iyo biyaha dhiiga leh. Dhiiga oo dhan badanaa waxaa loo isticmaalaa qaliinka furan ee wadnaha.  Waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa isku bedelka dhiiga (bedelid buuxda ee dhiiga ilmaha) ee ilmaha imika ku dhashey xanuunada dhiiga ee caruurta. Caan ma aha waxsoo saarkan in loo isticmaalo sababo kale.

**Unugyada dhiiga cas ee baakideysan**

Unugyada dhiiga cas waxay qaadaan oksijiinka unugyada. Unugyada dhiiga cas ee baakideysan waxay inta ugu badan ka saaraan biyaha dhiiga leh ee laga saaray dhiiga oo dhan. Unugyada urursan badanka waxaa laga siiyaa xididka ilaa laba (2) ilaa afar (4) saacadood. Tan waxaa loo siiyaa si loo bedelo unugyada cas ee ku lumay dhiig baxa, burburka dhiiga cas (burburka unugyada dhiiga cas), ama marka dhuuxu uusoo saaro unugyo cas oo yar. Waxsoo saarkan yari ee unugyadu waxaa sababi kara: guul dareysiga dhuuxa, cancerka dhuuxa ku dhaca, saameynta daaweynta cancerka ee loo isticmaalka daaweynta cancerka, ama dhiig yaraan ay keentay unugyada aan qaan gaadhin.

**Biyaha dhiiga barafeysan leh ee fareeshka ah**

Waxaa ku jira sameeyaasha xinjirowga. Biyaha dhiiga ee cusub ee la qaboojiyey waa biyaha dhiiga ee fadhiya lana keydiyey kadib markii laga helay dhiiga deeq bixiyaha. Biyaha dhiiga ee cusub ee la qaboojiyey waxaa ku jira sameeyaal xinjirow oo badan. Waxaa badanaa la isticmaalaa kalideed ama lala isticmaalaa waxyaabaha ku badan

xinjirowga si loo bedelo heerarka hoose ee sameeyaasha xinjirta. Waxaa badanaa laga siiyaa xididka ilaa hal (1) ilaa laba (2) saacadood.

**Unugyada xinjirta dhiiga**

Jajabyada unugyada dhiiga kaaso ka caawiya dhiiga inuu xinjiroobo. Saxanyarooyinku waa jajabyada unugyada kaaso ka hortaga ama joojiya dhiigbaxa ama gunaadka adigoo ku xidhaya daloolka xidadka dhiiga. Saxanyarooyinka waxaa badanka laga siiyaa xididka ilaa dhowr daqiiqa hal saacad. Hadii dhuuxa bukaanku aanu sameynayn saxanyarooyinka, markaa isku bedelka saxanyarooyinka waxaa badanka loo baahan doonaa hal (1) wakhti ama laba (2) wakhti todobaadkii (ama badanka inta badan). Saxanyarooyinku waxaa sidoo kale la siin karaa marka saxanyarooyinka bukaanku ayna ushaqeynayn sida saxda ah daawooyin dartood, xanuun, ama dhaawac muuqda (sida marinka wadnaha la sameeyey).

**Waxyaabaha ku badan xinjirowga**

Waxyaabaha ku badan xinjirowga waa qeybta dhiiga ee ay ku jiraan kaliya sameeyaal xinjirow oo gaar ah sida: factor VIII (yaraanta hemophilia A), von Willebrand factor, iyo fibrinogen. Waxyaabaha ku badan xinjirowga imika waxaa badanka la siiyaa kaliya il fibrinogen (looga baahanyahey sameynta xinjirta). Qaar kamid ah bukaanada leh noocyada qaarkood ee hoos u dhaca xinjirowga ama bukaanada aanan laheyn buritiinka dhiiga waxay heli karaan waxyaabaha ku badan xinjirowga si loogu daaweeyo cilada xinjirowgooda. Sidoo kale, bukaanada aadka u xanuusanaya waxey sameyn karaan xaalad xinjirow oo aan caadi aheyn loo yaqaano DIC (disseminated intravascular coagulation). Tani waxey sameyn kartaa yaraan sameeyaasha xinjirowga jidhka wayna sababi kartaa dhiig baxa halista ah. Waxyaabaha ku badan xinjirowga iyo biyaha dhiiga barafeysan leh ee fareeshka ah (fiiri kor) waxaa loo siin karaa si ay u caawiso badelida xaaladaha xinjirowga ee hooseeya. Waxyaabaha ku badan xinjirowga waxaa badanka la siiyaa inka badan dhowr daqiiqo ilaa hal saacad xididka.

**Unugyada difaaca jidhka**

Unugyada kaasoo ka caawinaya in la dagaalanto xanuunada. Unugyada difaaca jidhka waxaa sidoo kale la idhaa neutrophils. Waa unugyo kaasoo caawiya inuu la dagaalamo xanuunada bakteeriyada ama funguska. Unugyada difaaca jidhka waxaa marmar la siiyaa si ay uu caawiyaan iney la dagaalamaan xanuunada halista ah ee bukaanada kuwaaso leh tiro aad u yar oo unugyada difaaca jidhka ah ee dhiiga ku jira oo aanan ka jawaabin daawoyinka. Badanka unugyada difaaca jidhku waxaa la siiya si maalinle ah ilaa shan (5) cisho ama ilaa tirade unugyada difaaca jidhku kusoo noqonayaan heer kaasoo bukaanka u ogolaanaya inuu la dagaalamo xanuunka si iskood ah. Unugyada difaaca jidhka waxaa badanaa lagu mudaa xididka ilaa hal (1) ilaa laba (2) saacadood.

## Halisaha Suurtogalka ah

Mararka qaarkood waxaa jiro ka hortaga falcelinta ee ku dhacdaa isticmaalka qeybta dhiiga. Badanka falgaladan caan ma aha badankana si fudud ayaa loo maamuli karaa. Hadii falgal aan loo baahneyn dhaco, habab kale oo lagu xaliyo dhibaatada ayaa la isticmaali karaa.

- Falgalada aan la rabin ee difaacu keeno way dhici karaan hadii nidaamka difaaca bukanku la falgalo qeybaha dhiiga. Sidoo kale dhici kartaa hadii unugyada difaaca ee qeybaha dhiigu la falgalaan unugyada bukaanka ama dareerayaasha. Falcelinadaan caadi ma ahan. Waxaa ku jiri kara:
    - Falgalada allergyga
    - Suuxida allergyga
    - Sameynta unugyada dhiig casa ma saxaryaraasha kuwaasoo yareeya nolosha unugyadan ee dhiiga ku jira
    - Dhaawac la xidhiida-isku bedelka nudaha wadnaha (TRALI)
    - Burburin dib u dhacdey ee unugyada dhiiga cas
    - Xanuunada martigaliyaha iyo jarida qeyb jidhka ah (GVHD)

- Waxaa jira sidoo kale falgalo aan la rabin ee aan difaacu-keenin kuwaasoo dhici kara. Intooda badan waa dhif. Kuwan waxaa ku jiri kara:
    - Dhibaatooyin dhiigbax
    - Buuxsamid dareere
    - Falgalka ka imanaya pottasiumta badan ee qaybaha dhiiga
    - Muditaanka gacmaha iyo dibnaha ay sababtay heerka calciumka ee dhiiiga oo yaraadey
    - Buuxsamida iron ee nudaha jidhka (kaasoo dhici kara bukaanada hela in ka badan 100 tirsi oo isku bedelida unugyada dhiiga cas)
- Xanuun ayaa dhici kara isticmaalka qeybaha dhiiga ee ku jira bacteria, virus (sida cytomegalovirus (CMV), Hepatitis B iyo C, ama HIV) ama dulin. Caabuqyada ku shubida waa marmar maadaama baaritaanka dhiiga ku deeqayaasha iyo baaritaanka iyo fiiltareynta dhiiga uu ka dhigay bixiyaha dhiiga Mareykanka meesha ugu badbaadsan ee weligii joogay. Halista la kulmida Cagaarshowga B waxaa lagu sii yareyn karaa cirbid.

Ka baro wax badan oo halisahaan ku saabsan adiga oo la hadlayo kooxdaada daryeelka caafimaadka, adiga oo aqrinayo sharaxaadaha falcelinada ka hortaga iyo adiga oo booqanayo boggaga lagu taliyay.

## Aastaamaha Dhibaatada Suurtogalka ah

Aastaamaha lagu daaweynayo ku darida:

- Xumad ka sareysa 100,6 °F (38 °C) oo afka laga qaadey, cadaadisku wuu is bedelaa
- Qadhqadhyo, madax xanuun, calool xanuun, dawakhaad, saxaro jilicsan ama dhabar xanuun
- Kaadi midab-madow, shini, cuncun, hoos u hadal ama yaraansho neefsi ama dhibaatooyin neefsi
- Barar lugaha ama kuraamaha, ama qufac kaasoo aan jirin isku bedelka kahor
- Falgalo dib udhacey. Xaalado yar, falgalo dib u dhacey waxey dhici kartaa saddex (3) ilaa toban (10) cisho kadib isku bedelka unugyada dhiiga ee cas. Garaac dhakhtarka ilmahaaga hadii ilmahaagu xumad yeesho ama dareemi noqdo joonis ku dhaco (midab huruuda oo diirka ah iyo cadaan indhaha ah) saddex (3) ilaa toban (10) cisho kadib isku bedelka dhiiga.

Hadii ilmahaagu leeyahey calaamado kadib helida waxsoo saar dhiig, garaac kalkaalisadaada ama dhakhtarkaaga isla markaaba.

## Badelada

Marmarka qaar waxaa jira dookhyo kale. Kooxdaada daryeelka caafimaadku waxey kaala hadli karaan kuwee la isticmaali karaa, iyadoo lagu saleeyey xaalada ilmahaaga. Kuwan waxaa ku jira:

- Daawooyinka kuwaaso kicin kara dhuuxu inuu sameeyo unugyo dhiig cas oo badan (erythropoietin), unugyada dhiiga ee cad (granulocyte-colony stimulating factors), iyo saxaryaraasha (interleukin-11). Wakiilada cusub waa la hormariyay.
- Dhibaatooyin dhiigbax waxaa lagu daaweyn karaa: siinta sameeyaal xinjirow oo gaar ah (sida Coagulation Factor VIII or IX concentrates), ama siinta daawooyin kuwaasoo yareeya halista dhiigbaxa afka iyo cunaha (Amicar) ama kordhinta heerka sameeyaasha xinjirowga gaarka ah (DDAVP). Haddii dhiig baxa uu sababay daawada ka horaga ee jirka ku jirta, tani waxaa dib loogu celin karaa daawada u roon saameynta ka hortaga.
- Qaar ka mid ah waaladiinta qaba qaliinka waa la keydin karaa dhiigooda gaarka ah qaliinka ka hor. Qaliinka kadib, waxay dib u helaan dhiigooda (qeybta unugyada isku midka ah). Bukaanada kale waxay heli karaan dhiigooda ay ku waayeen qaliinka ee dib loo siiyay (nidaamka dhiig soo celinta).
- Waxaad sidoo kale weydiin kartaa ku deeqaha gaarka ah ee dhiiga ku bixinayo ku shubida, haddii ku deeqaha la mid yahay iyo dhiiga uusan laheyn qeybaha caabuqyada. Khibrad ayaa tustey in tirade deeqbixiyaha aanay ka badbaado badneyn dhiig ka yimid deeqbixiye dhiig oo tabaruce ah oo caadi ah. Bukaanada qaarkood way u dulqaadan karaan heerka buritiinka dhiiga cas oo dhoor maalmood qaliinka kadib oo dib u dhiso qaliinka dhiigooda gaarka ah iyada oo la qaadanayo bir dheeraad ah.
    - Fadlan qoro deeqbixiyaasha dhiiga ee tooska ah waxaa si dhif ah loo isticmaalaa daryeelka buuxa ee ilmaha waayo wakhtiga loo baahanyahey in la eego lana hagaajiyo dhiigan.
- Bukaanada qaar, sababo diimood awgood, waxey isku dayaan inay joojiyaan isku bedelka waxsoo saarka dhiiga. Badelka kore waa loo heli karaa iyaga. Mustaqbalka, badelka dhiiga wuxuu noqon karaa dooqa ee bukaanka noocaas ah.

## Kheyraadka

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan qeybaha dhiiga, la hadal dhaqtarka canugaaga. Waxaad sidoo kale helaysaa xog web siteyadan:

- Ururka Mareykanka ee Keydadka Dhiiga (American Association of Blood Banks - AABB)
- Red Cross-ka Mareykanka (The American Red Cross)
- Xarunta Dhiiga Hoxworth (Hoxworth Blood Center)

Cusbooneysiinta Ugu dambeysay: 08/2021

Cincinnati Children's